[redacted]


# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad | Muqdisho, 1 Feberayo 1976 | L. 2

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 4 ee 29 Jennayo 1976 — *Qaybinta Cuntada.*


---

## BOGGA LABAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 17 disembar 1975, L. 15 — *Dallacsiin Sarakii.* Bog. 112

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 24 Jennayo 1976. L. 16 — *Magacaabid Sarkaal loo wakiishey Kharashka Miisaaniyada Sanada.* » 114

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 26 Jennayo 1976, L. 17 — *Dallacsiin Saraakii ka tirsan Ciidanka Booliska.* » 115

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 29 Jennayo 1976, L. 18 — *Qaabka Cusub ee X. Garyayaanka Guud.* » 119



Madbacadda Dawladda — Muqdisho

[redacted]



XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 14 Jennayo 1976, L. 19 — *Magacaabid Guddiga Kacaanka ee Degmada Belet-Xaawo qaybteeda Wakiillada Beesha.* Bog. 125

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5 Jennayo 1976, L. 20 — *Dhul Dowledeed la siiyay gacantana loo geliyay (Libera disponibilità) Jaalle Cabdi Jaamac, ku fadhiya mq. 4.995, kuuna yaal Muqdisho Km. V. Jidka Afgooye.* » 127

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 4 Feberayo 1976, L. 21 — *Iskaashatada Ganacsiga «Hantiwadag».* » 128

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 4 Feberayo 1976, L. 22 — *Iskaashatada Ganacsiga «Waamo».* » 129

---

## BOGGA SEDDAXAD

### TALOOYIN IŞGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16 Junyo 1975, Lumidda Buugga kaydka lamb. 8843, Shs. 550 — *Iskana lahaa Jaalle Yuusuf Jaamac Barre. (30)* » 130

---

# BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 4 ee 29 Jennayo 1976.

Qaybinta Cuntada.

## GUDDOONSHAHA

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Inay lagama maarmaan in sharci cad loo sameeyo qaybinta cuntada si loogu daryeelo danaha Dadweynaha;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka fadhigoodii ahaa 8dii Janaayo, 1976 iyo kii labada Gole ee 15kii Jannayo 1976;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qaybta 1aad

### NIDAAMKA GAARSIINTA CUNTADA DADWEYNAHA DEGGAN GOBOLLADA DEGMOOYINKA TUULOOYINKA IYO REERMIYIGA

#### Qodobka 1aad

1. Wakaaladda Ganacsiga Ummadda iyo Wakaaladda Horumarinta Beeraha, Gobol kasta waa inay geeyaan wixii cunto ah ee uu u baahan yahay ama loogu talagalay.

2. Laamaha Gobollada ee labada Wakaaladood ee kor ku xusan waxay cuntada ka gadayaan Wakaaladaha Ganacsiga Degmada ee Gobolkaasi ka kooban yahay iyagoo mar walba raacaya go'aannada Guddida Kacaanka Gobolka ee cunnada saameeya.

3. Gobolka Banaadir toos ayay uga soo qaadanayaan Bakhaarada ENC iyo ADC cuntada looga baahan yahay magaala Madaxda si ay ugu qabiyaan Dukaanleeyda yar yar ee Xamar.

4. Wakaaladda Gancasiga Ummadda iyo Wakaaladda Horumarinta Beeraha waxaa waajib ah io Wakaaladda Ganacsiga Degmooyinka la habeeyaan wixii xisaab heyn, buug gelin iy tiro celin ah.

5. Wakaaladdaha Ganacsiga Degmooyinka (ama Dawladda Hoose ee Xamar) toos ayay cuntada uga gadayaan dukaanleyda yar yar ee loo aqoonsaday cuntada gedisteeda ee ku yaalla magaala madaxda Degmada iyo Tuulooyinka.

6. Tuulooyinka waxaa cunta gaarsiintooda xil ka saaran yahay Wakaaladda Ganacsiga ee Degmada.

Qodobka 2aad

1. Dukaanlaydu toos ayay cuntada uga gadayaan dadweynaha iyagoo raacaaya sharcigan.

2. Wixii cunto ah ee aan Sonkor iyo Saliid ahayn si furan oo tafaariiq ah ayey dukaannada hayaa ama suuqyada u furani uga gadan dadweynaha.

3. Sonkorta iyo Saliida iyo cuntadii kale ee loo baahdo in la xadido si joogta ah ama ku meel gaar ah, waxaa qols walba oo magaalo ama tualo leggani dukaamada kaga galanayaan iyagoo isticmaalaaya Kaadh u khaas ah oo muujinaaya inta ay xaq u leeyihiin iyo dukaanka qaabilsan.

Qaybta 2aad

Qodobka 3aad

1. Dukaamada cuntada gada ee magaalooyinka iyo tuulooyinka waxaa habeynaaya Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka iyo Tuulooyinka (Banaadirna Dawladda Hoose ee Xamar).

2. Guddi waliba waa in dukaamada Degmadiisa ama Tuulooyinkiisa ku yaalla u tirsanaadaan una qornaadaa.

3. Waa in Guddi kasta hubiyaa inaan dukaan gedaaya cuntada kor lagu tilmaamay la furi karin, fasax la'aantitiisa; fasaxaasina waxay ku bixin karaan markii ay ogaadaan inay thaay meeshii ooga baahnaa.

4. Dukaan waba inta qoys ee Sonkorta iyo Saliida ka qaadanaysa waxaa goynaaya Guddiga Kacaanka ee Degmada ama tuulada iyagoo ku xisaabtamaaaya tirada qoysaska meesha deggan iyo tirada dukaamada ku yaalla.

.5 Waa in bakhaar kassta oy leedahay Dawladda Hoose ama Wakaaladda Ganacssiga Degmada laga helaa liistada dukaamada ay siiso Sonkorta iyo Saliidda.

6. Waa in xaafad kasta laga heli karaa liisto muujinaysa dukaamada iyo qoysaska ee ay wax siiyaan, dukaan kastana haystaa liistada, magacyada iyo lambarada kaadhadka uu wax ku bixinaayo.

7. Dukaankii sabab u xirmaaya waa in waqti haboon la ogeysiiyaa Xafiiska tuulada ama Xaafadda qaabilsan si dadkii Sonkorta iyo saliida ka qaadan jiray jid kale loogu furo.

## Qaybta 3aad

## HABAYNTA QOYSKA

### Qodobka 4aad

1. Guddiyada Kacaanka ee Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka waxaa loo xilsaaray in qoysaska magaalooyinkooda ku nooli u tirsanaadaan ama u qiyaasnaadaan.

2. Waa in qoys waliba lahaadaa kaadh lambarsan oo ay ku qoran tahay tirada qoyska, iyo dukaanka uu Sonkorta iyo Saliidda ka gadanayo iyo wixii kale ee cadayn ah.

3. Haddii qoys dad ku soo kordho ama ka dhinmo waa inay ogeysiiyaan Xafiiska qaabilsan si qiyaasta cuntada kaadhka ugu taalaa loo beddelo. Xafiika qaabilsani waa inuu arrinta deg deg u hubiyaa dabadeedna g'oaanka gaaraa.

4. Haddii uu qoys xaafada cusub u wareego waa in qoyskaasi war geliyo Xafiisyada labada xaafadood ee arrinta qaabilsan iyana deg deg u dhameeyaan wixii beddelaad ah ee kaadhka iyo cuntada wareejiska cusubi la yimaaddaan.

## Qaybta 4aad

## QIYAASTA SONKORTA IYO SALIIDDA QOYSKA LA SIINAAYO

### Qodobka 5aad

1. Qiyaasta Sonkorta iyo Saliidda la siinaayo qoyska si caadi ahaan ah waxaa goynayaa Dawladda Dhexe iyadoo ku fadhiisinaysa awoodda dhaqaalaha Dalka.

2. Tirada qoyska caadiga ah ee Soomaaiyeed waxaa lagu talagelayaa inuu ka kooban yahay affar qof. Haddii uu qoys intaas ka badan yahay, qiyaasta cuntada loogu talagelayaana waxay isla beddelaysaa inta tiradoodu noqoto marka la hubiyo.

3. Markii Sonkorta iyo saliiddu ama cuntada kale qaarkeed uu dalka ka dhamaado, ama gobol ama Degmo khaas ah sabab uun uga yaraato (ama ak badato), qiyaasta caadiga ah ee qoyska u go'an, waxaa si ku meel gaadh ah wax uga beddeli kara Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama Degmada ama Tuulada arrintaasi khusayso.

Qodobka 6aad

1. Warshadaha wax soo saaridoodu u baahan tahay Sonkor ama nooc kale oo cunta ah waxaa intii loo qiyaaso baahidooda ay toos uga qaadanayaan Laanta Wakaaladda Ganacsiga Ummadda, Wakaaladda Horumarinta Beeraha ee ku taalla Gobolkaas ama uga dhow.

Qaybta 5aad

## MAKHAAYADAHA IYO MEELAHA CUNTADA LAGU KARIYO IYO WIXII LA MID AH

Qodobka 7aad

1. Makhaayadaha iyo meelaha cuntada lagu kariyo, cuntada aan ahayn Sonkorta iyo Saliidda waxay si caadi h uga qaadanayaan bakhaarada Wakaaladda Ganacsiga Degmada ama dukaanleyda.

2. Wixii Sonkor ama saliid ku saabsan Guddiga Kacaanka ee Degmada (Dawladda Hoose Gobolka Banaadir) ayaa nidaam u sameyneysa sida wax lagu siiyo, kaas oo noqon kara dukaan ama bakhaar khaas ah oo Degmada amaba Tuulada ku yaalla oo si qiyaasan wax looga siiyo.

Qaybta 6aad

## CISBITAALLADA, CIIDAMADA QALABKA SIDA, DUGSIYADA, KULLIYADAHA IYO WAAX LA MID AH

Qodobka 8aad

1. Xeryaha ay leeyihiin Ururrada kor ku xusan ee dad badan wax looga kariyo waxay cuntadooda ka qaadan karaan Wakaaladda Ganacsiga Ummadda iyo Wakaaladda Horumarinta Beeraha ee Gobolka ay ku yaaliin.

2. Qiyaasta Cuntada la siinaayo waxay ku koobnaanaysaa dadka badan ee xaraysan ee meel wax loogu korinaayo oo keli ah.

Qaybta 7aad

## REER MIYIGA

Qodobka 9aad

1. Xubnaha Dawladda ee cuntada qaybiska ku shuqul lihi waa ineey had iyo goor tixgeliyaan baahida cuntada ee Reer Miyiga.

2. Waa in Guddiga Kacaanka ee Gobolka, Degmooyinka reer miyigu ku badan yahay cuntada loogu roonaadaa.

3. Waa in Guddida Kacaanka ee Degmada cuntada Reer Miyigu u baahan yahay tuulooyinka gaysaa una badisaa.

4. Waa in Guddiyada Kacaanka ee Gobolka, Degmada iyo tu ladaba ay hab fudud oo ay isla wada ogyihiin u sameeyaan sida iyo qiyaasta iyo meelaha ay dadka reer miyiga ahi Sonkorta iyo saliida uga gadan lahaayeen. Cuntada kale sida caadiga ah ayay u gadanayaan.

Qodobka 10aad

1. Cid kastsa oo wax kala gadanaysa xaq bay u leeyihiin inay wax ku kala miisaantaan marka ay gadashadu socoto.

2. Meeshii cunto lagu gadayo waa waajib inay yaaliin miisaanada ama weelka wax lagu miiso ee sharciga ah ee ku habboon meesha si loo isticmaalo haddii qofkii wax gadanayaa warsado.

## Qaybta 8aad

## SICIR GOYNTA

Qodobka 11aad

1. Wixii Sicir goynta cuntada ku saabsan waxaa loo xilsaaray Wasaaradda Ganacsiga iyadoo la kaashanaysa Wakaaladda Cunta gacanta ku haya.

## Qaybta 9aad

## FULINTA SHARCIGA

Qodobka 12aad

1. Fulitaanka sharciga waxaa xil ka saaran yahay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda, Wakaaladda Horumarinta Beeraha, Dawladda Hoose ee Xamar, Wakaaladda Ganacsiga Degmooyinka, Guddiyada Kacaanka ee Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka.

2. Ilaalinta fulintaanka sharcigan waxa xil ka saaran yahay Wasaaradda Ganacsiga, Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Ciidanka Booliska, Ciidanka Nabad Sugidda iyo Guddiyada Kacaanka ee Gobollada, Degmiiyinka iyo Tuulooyinka.

Qodobka 13aad

## C I Q A A B T A

1. Qof alla qofkii ku xad gudba sharcigaan, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano oo xarig ah ama ilaa 20.000 shilin oo ganaax ah.

Qodobka 14aad

1. Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 8 Jannayo 1976, waxaana lagu dhaqaaqi doonaa habka cusub ee Qaybinta cuntada Sharcigan faraayo marka laga bilaabo 1 Febbaraayo 1976.
2. Sharcigan waxaa lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Jannayo 1976.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER L. 15 ee 17 Disembar 1975.**

**Dallacsiin Saraakiil.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23-12-1972 Dhismaha Ciidanka Boliska;

ASAGOO TIIGELIYEY Wadanimimadooda iyo Kacaan-nimadooda;

ASAGOO DEGEYSTAY Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, markii ay saraakishaasi guteen wajibkoodii ilaa iyo intii ay hayeen jagada Guddoomiyeyaasha Guddiga Kacaanka ee Degmooyinka;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 1da Jannayo 1976, in la dallacsiiyo lana gaarsiiyo darajada Sarkaal walba hortiisa ku qoran, kalana ah:

1. Dhamme Maxamed Cigge Cilmi — oo ka tiraan Ciidanka Boliska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey darajada Gashaanle;
2. Xiddigle Cilmi Xirsi Cali — oo ka tirsan Ciidanka Boliska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;
3. Xiddigle Nuur Muuse Cali — oo ka tirsan Ciidanka Boliska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;
4. Xiddigle Maxamuud Cali Bile — oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey darajada Laba-Xiddigle;
5. Xiddigle Cilmi Jaamac — oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey darajada Laba-Xiddigle;
6. Xiddigle Salaad Yuusuf — oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey darajada Laba-Xiddigle;
7. Xiddigle Maxamed Xuseen — oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeyd waxaa loo dallacsiiyey darajada Laba-Xiddigle.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17 Disembar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 6, bogga lam. 27;*
*Muqdisho, 21 Disembar 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*

G. Dhexe Cabdiillaahi Warsame Nuuur.

XEER L. 16 ee 12 Febrayo 1976.

Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Kharashka Miisaaniyadda sannadka 1976.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashidii Koowaad ee Kacaanka ee siinayaa Golaha Sare ee Kacaanka awooda soo saaridda sharciga, garsoosidda iyo fulinta;

MARKAAN ARKAY Dikrteeada sharciga ee soo baxday 29kii dishembar 1961, lamb. 2, Amarka Maamulka Xisaabaadka;

MARKAAN ARKAY D.P.R. 20 Maarso 1965, L. 13, xeerka nidaaminta iyo abaabulida xeerka joogtada ah ee ku saabsanaa Madaxtooyadii hore ee Guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriiray iyo wixii beddelaad gashay;

MARKII LA GARAYSTAY In loo baahanyahay sarkaal shaqaale ee loo wakiisho maamulka lacagta Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka iyo dhammaan xubnaha kale duwan ee raacsan: Agaasimayaasha Guud Xafiisyada iyo qaybaha maamulka ee lagu tilmaamay sharcigii lambarkiisu ahaa 1 taariikhdiisuna ahayd 4-1-1968, ayadoo uu siinayo awood maamulidda qardaysiga ku tala gelida kharashka shaqa socodsiinta, iskuduwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la garaysan karo kuna saabsan qardada (soo hormarin) la sameeyo, ogolaashada rukhsada safarka dibedda iyo gudahaba.

DEKREETA:

Qodobka 1aad

Sarkaalka la yiraahdo Jaalle Maxamed Xaaji Cabdi «Fartaag» — Darajo A3-6 — Agaasimaha Guud ee Lacagta MGSK — ku meel gaar ah, waxa lagu magacaabay Sarkaal Wakiileed Kharashka Miisaaniyadda sannadkan ee Lacagta MGSK iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, ka bilaabato 10 Febrayo 7976, waxayna baabi'ineysaa dikreetadii lambarkiisu yahay 000379 ee 24 Jannayo 1976.

Dikreetadatanu waxay dhaqan galaaysaa hadhadatan, isla markaana waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Febbraayo 1976.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lab. 24.*
*Muqdisho, 14 Febbrayo 1976.*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

XEER L. 17 ee 26 Jennayo 1976.

Dallacsiin Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23-12-1972, dhismaha Ciidanka Boliiska;

ASAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska kuna soo sheegay waraaqiqikiisa lambar SEC-A-8-1 ee 13 Jennayo 1976 iyo 25 Jennayo 1976;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadooda wanaagsan, u bislaan dallacaadeed iyo u qalmid;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii uu soo jeediycy Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In markaa laga bilaabo 1 Jennayo 1976 saraakiisha hoos ku magacaaban oo ka tirsan Ciidanka Boliiska la dallacsiiyey lana gaarsiiyey sarkaal walba darajada hortiisa ku qoran:

1. Dhamme Nuur Xasan Xueen — Waxaa loo dallacsiiyey Gaashaanle;
2. Dhamme Caydiid Cabdullaahi Ilkaxanaf — Waxaa loo dalla-c siiyey Gaashanle;
3. Dhamme Abshir Saalax Maxamuud — Waxaa loo dallacsiiyey Gashaanle;
4. Dhame Cabdullaahi Saciid Samantar — Waxaa loo dallacsiiyey Gashaanle;
5. Dhamme Xuseen Weheliye Shuuriye — Waxaa looo dallacsiiyey Gashaanle;
6. Dhamme Cabdullaahi Sheekh Cali — Waxaa loo dallacsiiyey Gashaanle;

7. Dhamme Cismaan Xaaji Cumar — Waxaa loo dallacsiiyey Gaashaanle;

8. Dhamme Cali Jiroow Sharmarke — Waxaa loo dallacsiiyey Gaashaanle;

9. Dhamme Yuusuf Axmed Muuuse — Waxaa loo dallacsiiyey Gaashaanle;

10. Dhamme Maxamuud Xasan Cali — Waxaa loo dallacsiiyey Gaashaanle;

11. L. Xiddigle Maxamed Xaaji Maxamed — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

12. L. Xiddigle Maxamed Maxamuud Nuur — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

13. L. Xiddigle Isaaq Iidow Raage — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

14. L. Xiddigle Shariif Sheekhunaa Maye — Waxaa loo dallacsiyey Dhamme;

15. L. Xiddigle Maxamed Xasan Maxamed — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

16. L. Xiddigle Cumar Xaaji Faarax — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

17. L. Xiddigle Warsame Kuulmie Guuleed — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

18. L. Xiddigle Saciid Maxamed Samantar — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

19. L. Xiddigle Calinuur Sahal Kooshin — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

20. L. Xiddigle Maxamed Cabdi Xasan — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

21. L. Xiddigle Bashir Salaad Cilmi — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

22. .L Xiddigle Cabdi Cali Cigaal — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

23. L. Xiddigle Saciid Caddib Caateeye — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

24. L. Xiddigle Cabdi Maxamed Aadan — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

25. L. Xiddigle Xuseen Ducaale Nuur — Waxaa loo dallacsiiyey Dhamme;

26. Xiddigle Cabdulqaadir Muuse Maxamed — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

27. Xiddigle Yuusuf Jibriil Carays — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

28. Xiddigle Yuusuf Cismaan Guuleed — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

29. Xiddigle Yaasiin Maxamed Warsame — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

30. Xiddigle Axmed Maxamed Cabdi — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

31. Xiddigle Saciid Ciise Cabdullaahi — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

32. Xiddigle Cabdulcasiis Aadan Jaamac — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

33. Xiddigle Cabdiraxmaan Raajis Maxamed — Waxaa dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

34. Xiddigle Shariif Mukhtaar Cabdulle — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

35. Xiddigle Mako Jaamac Xuseen — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

36. Xiddigle Maxamed Kabadhe Xasan — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

37. Xiddigle Xasan Xirsi Cali — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

38. Xiddigle Mire Xaydar Camaale — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

39. Xiddigle Shire Basal Xaaji — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

40. Xiddigle Maxamed Faarax Axmed — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

41. Xiddigle Aadan Cabdi Barrow — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

42. Xiddigle Maxamed Axmed Taakaw — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

43. Xiddigle Maxamed Aadan Faarax — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

44. Xiddigle Axmed Muuse Cali — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

45. Xiddigle Maxamed Xaashi Jaamac — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

46. Xiddigle Cali Faarax Warsame — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

47. Xiddigle Cabdulqaadir Cismaan Cabdi — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

48. Xiddigle Maxamuud Afrax Idle — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

49. Xiddigle Maxamed Xuseen Abiikar — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

50. Xiddigle Ibrahim Culusow Rooble — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

51. Xiddigle Yuusuf Axmed Maxamed — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle;

52. Xiddigle Nuur Kualne Xasan — Waxaa loo dallacsiiyey Laba-Xiddigle.

Qodobka 2aad

Xeerkani dedgdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu qori doon Faafinta Rasmiga ah ee Wawladda.

Muqdisho, 26 Jennayo 1976.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN AARGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lambar 170.*
*Muqdisho, 28 Jennayo 1976.*
*Hentidhawraha Guud:*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

XEER L. 18 ee 29 Jennayo 1976.
Dhismaha iyo qaabka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

## GUDDOONSHAHA

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AKRAY Xeerka Guddoonshaha G.S.K. Lamb. 166 taariikh. 19 Settembre 1972 ee ku saabsanaa hawsha iyo dhismaha Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda iyo Xeerka Habka Madaniga ee xushmadda Qareennada;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 14 taariikh. 4 Febraayo 1975 iyo beddelaadii ka dambeeyay ee lagu wareejiyay difaaca dacwadaha iyo xubnaheeda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo keli ah;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in hawsha iyo qaabka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda wax lagu kordhiyo lana ballaariyo si' Xafiiska u fuliyo hawsha loo xilsaaray.

## WUXUU XEERAYAA

### Qodobka 1aad

*Micnayn*

Haddii aan si kale loo micnayn, erayada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa, sida soo socota:

1) *«Xubnaha Dawladda»* — waxaa loola jeeda Laamaha ka irsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, Wasaaradda, Wakaalaha, Dawladah aHoose, Bankiyada, Sharikadaha iyo Mashruucyada ay Dawladdu leedahay ama qayb ku leedhay.

2) *«Doode»* — waxaa loola jeedaa Qareen ama La-Taliye sharci oo shahaado Sharci ee Jaamici ah haysta.

### Qodobka 2aad

*Dhismaha Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda*

1. Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ee hadda ka dib loo aqoonsandoono «XAFIIS» la guuna dhisay Xeerka Madaxweynaha G.S.K. lamb. 166 ee soo baxay 19 Settembre 1972 wuxuu ahaan doonaa Agaasin Guud raacsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka xagga maamulka, hase yeeshee u madax banaan fulinta hawsha sharci ahaan loo xilsaaray.

2. Xarunta Xafiisku waxay ahaandoontaa Muqdishu. Haddii loo baahdo, Xafiisku wuxuu ku yeelan karaa Gobollada Dalka Xafiisyaal hoos qimaada oo isla markiiba fuliya hawlaha loo xilsaaray Xafiiska.

## Qodobka 3aad

### *Hawsha Xafiiska*

Xafiiska waxaa loo xilsaaray in uu fuliyo hawlaha soo socda:

1. Inuu ka bixiyo talooyin sharci ah hadba arrimaha looga soo jeediyo Madaxtooyada G.S.K. iyo Xubnaha kale ee Dawladda.

2. Inuu daryeelo oo ilaaliyo xuquuqda iyo danta guud ee Dawladda iyo xubnaha Dawladda, gaar ahaani:

b) daafacaadda Dawladda iyo xubnaha Dawladda Maxkamadaha hortooda dhinaca dacwadaha madaniga, idaariga iyo maaliyada dalka gudahiisa ama dibaddiisa;
t) diyaarinta iyo iskuduwidda qandaraasyada iyo hashiisyada ay Dawladda Soomaaliyeed ama xubnaheedu dhinac ka yihiin;
j) hashiisyada ka dhalan kara dacwdaha ka socda Maxkamadaha isagoo kala tashanaaya xubinta Dawladda oo ku shaqo leh;
x) dhexdhexaadinta khilaaf kasta ee qeynuuni ah ee ka dhasha xubnaha Dawladda Dhexdooda iyadoo ra'yiga Xafiiska loo aqoonsandoona mid kama dambeyn ah.

3. Diyaarinta ama talo ka bixinta abaabulka (draft) sharciyada iyo xeerarka loo gudbinaayo Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga ama Golayaasha si loo sharciyeeyo.

4. Iskuduwidda iyo soo saaridda Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyo keydinta nuqullada asliga ah ee Sharciyada, Xeerarka iyo waraaqaha rasmiga ah ee ku soo baxa Faafinta Rasmiga.

5. Baaridda Cilmiga ah ee Sharciyada Dalka iyo Xeerarka Adduunka gaar ahaan kuwa ay soo saaraan Ururada ka dhaxeeya Dawladda.

6. Wax alaale wixii hawl ah ee Madaxweynaha G.S.K. ku amro Xafiiska.

## Qodobka 4aad

### *Qaabka Xafiiska*

Xafiisku wuxuu yeelandoonaa qaabka halkan ku lifaaqan oo ka mid ahaandoona Xeerkan.

## Qodobka 5aad

### *Gunnada iyo xushmadda Doodayaasha*

1. Doodayaasha Xafiiska ee haysta shahaadada Sharciga ee Jaamicaadda (law Graduates) marka laga reebo Garyaqaanka Guud ee Dawladda waxay xaq u yeelanayaan gunnada xirfadda (indennità professionale) oo loogu talo galay Garsoorayaasha ama Xeer Ilaaliyayaasha Maxkamadda Shahaado Jaamici ah.

2. Doodayaasha Xafiiska haddii ay dacwad ku guuleeystaan waxay xaq u leeyihiin xushmadda Qareennada ee dhinaca kale lagu xukumo.

## Qodobka 6aad

*Xilka iyo awooda Garyaqaanka Guud*

1. Garyaqaanka Guud madax ka ah Maamuulka Guud oo Xafiiska xil ka saaranyahay awoodna u leeyahay:

i) Kormeeraka, habeynta, socodsiinta iyo qeybinta hawlaha Xafiiska, isagoo daryeelaya danta guud ee Dawladda.

ii) Beddelaadda Doodayaasha Xafiiska isagoo la tashanaaya Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka.

iii) Tilaabooyinka la xiriirka edbinta shaqaalaha isagoo raacaaya habka sharcigu farayo.

iv) Bixinta talooyinka iyo tusaalooyinka loo baahanyahay ee ku soobsan hawlaha Xafiiska.

v) La socdsiinta Madaxtooyada G.S.K. yo Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga horumarka Xafiiska iyo wixii dhibaatooyin ah ee hadba Xafiiska horyimaada.

2. Haddii loo baahdo, Garyaqaanka Guud, isagoo la tashanaaya Madaxtooyada G.S.K. wuxuu ku meel gaar ahaan u beddeli karaa Doodayaasha Xafiiska, Wasaaradaha ama xubnaha kale ee Dawladda markaa looga baahdo.

## Qodobka 7aad

*Waaxyaha, Xubnaha iyo Laamaha*

Xafiiska Garyaqaanka Guud si uu u fuliyo hawlaha loo xilsaaray ee lagu tilmaamay qodobka 3aad ee Sharcigan wuxuu yeelan doonaa Waaxyo, Xubno iyo Laamo.

## Qodobka 8aad

*Magacaabidda Garyaqaanka Guud*

Garyaqaanka Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

## Qodobka 9aad

*Magacaabid Agaasimayaasha Waaxaha*

Agaasimayaasha Waaxaha waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, isagoo la tashanaaya Garyaqaanka Guud ee Dawldada.

Qodobka 10aad

*Xeer Hoose*

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaaya talooyinka Garyaqaanka Guud ee Dawladda wuxuu soo saari doonaa Xeer Hoose oo Fahfaahinaaya Xeerkan hadii loo baahdo.

Qodobka 11aad

*Burin Xeer*

Waxaa la buriyay Xeerka lamb. 166 ee soo baxay 17 Settembre 1972 iyo wax alaale wixii xeer ah ee qodobadda Xeerkan khilaafsan ama aan la socon karin.

Qodobka 12aad

*Dhaqan gelid*

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka laga biyaabo 1 Jannayo 1976, waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Jannayo 1976.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

XOGHAYAHA W. LACAGTA
*Dr. Cabduraxmaan Nuur Xirsi*

*WAAN ARAGNAY EE DIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga labz. 17.*
*Muqdisho, 11 Febberaayo 1976.*
*Hantidharaha Guud:*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

*LIFAAQAA KALIYA*

## QAABKA XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

| Habka iyo Jagada | Darajada | Xirfadda | Tirada | Lambarka jagada |
|---|---|---|---|---|
| **XAFIISKA GAYAQAANKA GUUD** | | | | |
| Garyaqaanka Guud ee Dawladda | A-2 | Qareen | 1 | 1.6001 |
| La-Taliye | A-5 | Qareen | 4 | 1.6002-5 |
| Sarkaal Fuliye (Xogh. gaar) | B-7 | Caawiye | 1 | 1.6006 |
| Sarkaal Fuliye | B-7 | Kaaliye Guud | 1 | 1.6007 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 1 | 1.6008 |
| **WAAAXDA LAAMAHA M.G.S.K. IYO WASAARADAHA** | | | | |
| Ku-Xigeen Garyaq. Guud ee D. | A-3 | Qareen | 1 | 1.7001 |
| La-Taliye | A-5 | Qareen | 1 | 1.7002 |
| Sarkaal Fuliye | B-8 | Kaaliye | 1 | 1.7003 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 1 | 1.7004 |
| **WAAXDA WAKAALADAHA DAWLADDA** | | | | |
| Ku-Xigeen Garyaq. Guu ee D. | A-3 | Qaareen | 1 | 1.8001 |
| La-Taliye | A-5 | Qareen | 1 | 1.8002 |
| Sarkaal Fuliye | B-8 | Kaaliye | 1 | 1.8003 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 1 | 1.8004 |
| **WAAXDA DAWLADAHA HOOSE IYO FULINTA XUKUNNADA** | | | | |
| Ku-Xigeen Garyaq. Guud ee D. | A-3 | Qareen | 1 | 1.9001 |
| La-Taliye | A-5 | Qareen | 1 | 1.9002 |
| Sarkaal Fuulie | B-8 | Kaaliye | 1 | 1.9003 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 1 | 1.9004 |
| **WAAXDA BANKIYADA, SHARIKADAHA IYO MASHRUUCYADA DAWLADDA** | | | | |
| Ku-Xigeen Garyaq. Guud ee D. | A-3 | Qareen | 1 | 2.0001 |
| La-Taliye | A-5 | Qareen | 1 | 2.0002 |
| Sarkaal Fulie | B-8 | Kaaliye | 1 | 2.0003 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 1 | 2.0004 |

| Habka iyo Jagada | Darajada | Xirfadda | Tirada | Lambarka jagada |
|---|---|---|---|---|
| | | **WAAXDA HABEYNTA SHARCIYADA, XEERARKA IYO FAAFINTA RASMIGA** | | |
| Ku-Xigeen Garyaq. Guud ee D. | A-5 | Qareen | 1 | 2.1001 |
| La-Taliye | A-5 | Qareen | 1 | 2.1002 |
| Turjumaan | A | Idaari | 1 | 2.1003 |
| Faafin Rasmi Qore-Redattore | B-7 | Idaari | 1 | 2.1004 |
| Maktab Haaye | B-7 | Idaari | 1 | 2.1005 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 1 | 2.1006 |
| Karaani | C-9 | Karaani | 1 | 2.1007 |
| | | **XAFIISKA WAKIILADA GOBOLLADA** | | |
| La-Taliye | A-4 | Qareen | 4 | 2.2001-4 |
| Sarkaal Fuliye | B-8 | Kaaliye | 4 | 2.2005-8 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 4 | 2.2009-12 |
| Adeege | D | Shaqada Hoose | 4 | 2.2013-16 |
| Ilaaliye | D | Shaqada Hoose | 12 | 2.2017-28 |
| | | **XAFIISKA MAAMULKA GUUD** | | |
| Maamulka Lacagta | B-7 | Xisaabiye | 1 | 2.3001 |
| Sarkaal Fuliye | B-8 | Kaaliye | 2 | 2.3002-3 |
| Makiino Garaace | C-8 | Qore | 2 | 2.3004-5 |
| Adeege | D | Shaqada Hoose | 3 | 2.3006-8 |
| Ilaaliye | D | Shaqada Hoose | 3 | 2.3009-11 |

**XEER L. 19 ee 14 Jennayo 1976.**

**Magacaabid Guddiga Kacaanka ee Degmada Belet-Xaawo, qayteeda Wakiil-lada Beesha.**

## XOGAHYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAYXaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 8-6-1972kii lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9 1972kii ku saabsan Mamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lambarkiisu yahay 102, taariikh 26-9-1973 lagu qoray Faafinta Rasmiga ee Dawladda, taariikh 11-9-1973kii ku saabsan dhismaha Gobollada: Bay, Gedo iyo Bakool;

ISAGOO OGADAY Iney lagama marmaan tahay in cusbooneysiiyo magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmada Beled-Xaawo;
ISAGOO TIXGELIYEY Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Gedo;

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

Magacawga Guddiga Kacaanka ee Degmada Belet-Xaawo, qaybtiisa wakiillada beesha.

Ka bilaabanta 20-10-1974kii, dadka magacyadoodu halkan hoos ku taxaa yihiin, waxaa loo magacabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ku hoos qoran yihiin:

### DEGMADA BELET-XAAWO

1. Haajir Sheekh Maxamed;
2. Xaaji Yuusuf Muuse Cali;
3. Xaaji Cali Aadan;
4. Sheekh Cabdulqaadir Sheekh Xasan;
5. Sheekh Maxamed Xayd Cusmaan;
6. Sheekh Maxamed Cusmaan Cabdulle;
7. Faaduma Abiikar Aadan;

8. Buraale Xasan Maxamed;
9. Dahaba Aadan Cali;
10. Daahir Cali Jaamac;
11. Cabdullaahi Isaaq Cabdi Maxamed;
12. Xuseen Cusmaan Ibraahim;
13. Kulmie Cabdi Rooble.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974ka, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Jennayo 1976.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Guud

*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lab. 1, bogga lamb. 150.*
*Muqdisho, 24 Jennayo 1976.*
*Hantidhawraha Guud:*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuuur

**XEER L. 20 ee 5 Jennayo 1976.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Libera disponibilità) Jalle Cabdi Cigaal Jaamac, ku fadhiya mq. 4.995, kuna yaal Muqdisho — Km. V. Jdka Afgooye.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Amar Xeer Lamb. 115 soona baxday 13 Settembre 1956;

ISAGOO ARKAY Xeer Lamb. 41 soona baxay 1 Nofembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed lamb. 56 ee Reb. taarikhda markay aheyd 27 Agosto 1975, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Lamb. 4, R. 3 ee25 Maarso 1975, taas oo lagu siiyay Jaalle Cabdi Cigaal Jaamac cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 4995 kuna yaal Muqdisho — Km. V. Jdka Afgooye;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 10022 taas oo beddeshay midii hore lambarkeedu ahaa 6966 laguna aqoonsaday fadhigii 31°aad ee Guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikh. markay aheyd 28 Oktoobar 1975 kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha dhuulka, taarikhdeeduna aheyd 30-12-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolqdeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 10022 ee 28-10-1975 laguna haqiijiyay sida ay noqshaddu guuriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar — Km. V Jidka Afgooye laguna siiyay xaashida lamb. 10073 taarikhdeedunua aheyd 16 Nofember 1975 oo waafaqsan naqshaddi oo hore loo ogolaaday;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliayay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Liber disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

XEER

Waxaa dhul Dowladdeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Libera Disponibilità) loona aqoonsaday Cabdi Jaamac, dhul ku fadhiya mq. 4.995, kuna yaal Muqdisho — Km. V — Jidka Afgooye.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

*WAAN ARAGNA YEE DIIWAANGENLINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 1.*
*Muqdisho, 8 Jennayo 1976.*
*Hantidhawraha Guud:*
Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

**XEER L. 21 ee 4 Jennayo 1976.**

**Iskaashatada Ganacsiga «Hantiwadag».**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qoray Guddoomiyaha Iskaabshatada Ganacsiga ee lagu magacaabo «Hantiwadaag» ee Magaalada Yeed;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Yeed iyo kan Gobolka Bakool;

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga ee lagu magacaabo «Hantiwadaag», ee sal1 dhigee du yahay Magaalad Yeed shaqadeeduna tahay ganacsiga Xabakta; Xoolaha nool iyo Badeecadda ay ka mid yhiin Dharka Cad iyo Galleyda Shiidan, waxaa laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 40ka oo dhaqan galy 4-10-1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Ganacsiga ee lgu magacaabo «Hntiwadaag» waxay yeelanysa qoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.

Muqdisho, 4 Febrayo 1976.

XOGHAYAAH DAWLADDA
*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*

XEER L .22. ee 4 Jennayo 1976.

Iskaashadada Ganacsiga «Waamo».

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qoray Guddoomiyaha Iskaashatada Ganacsiga ee lagu magacaabo «Waamo» ee Magaalada Afmadoow;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Afmadkw iyo kan Gobolka J. Hoose;

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga ee lagu magacaabo «Waamo», ee saldhigeedu yahay Magaalada Afmadoow, shaqadeeduna tahay ganacsiga cuntada; dharka; xoolaha; hargaha iwm, waxaa laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 40 oo dhaqan galay 4-10-1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Ganacsiga ee lagu magacaabo «Waamo» waxay yeelanaysa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.

Muqdisho, 4 Febrayo 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*

# BOGGA SEDDAXAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

---

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

GARSOORAHA AMXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU Arkay weydiinta horay ku qoran;

HADDUU Arkay qod. 69 D. L. 1969 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga keydka lab. 8843 oo ay ku jirto Shs. 550 (shanboqolkonton) iskana lahaa Jaalle Yuusuf Jaamac Barre, sida ku cad warqadda lam. DRO 8843;

WUXUU AMRAYAA

In Jaallaha kor ku magacaaban loo sameeyo buug keyd cusub ka dib marki ay ka soo wareegato 30 maalmood marki dekreetan ku soo baxdo buugga Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buuggaas la samyendoono gacanta laga galiyo Yuusuf Jaamac Barre ama qof wakaalad sharci ah ka sita asaga, ayadoo la hubinayo muddada 30ka maalmood ah ee kor lagu soo sheegay, in cidna cabasho keensan.

Xamar, 16 Junyo 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA

*Yaasiin Shira Faara*